Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

# *Hirgeli Tilmaamaha: Shaybaadhka Hore ee Dyslexia*

**2020**

# HIRGELI TILMAAMAHA: SHAYBAADHKA HORE EE DYSLEXIA

## 2020

**Glenna Gallo, M.S., M.B.A.**
**Caawiyaha Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Gaarka**

**Kathe Taylor, Ph.D.**
**Kaaliyaha Maamulka Waxbarashada iyo Wax Dhigista**

**Waxaa diyaariyay:**

- **Aira Jackson**, Maamulaha Farshaxanka iyo Aqoonta Luuqada Ingiriisiga
  aira.jackson@k12.wa.us | 360-725-6228
- **Benjamin Everett**, Kaaliyaha Maamulka Farshaxanka Luuqada Ingiriisiga
  ben.everett@k12.wa.us | 360-725-6064
- **Dr. Alicia Roberts Frank**, Maamulaha Deegaanka ee Khabiirka Barnaamijyada/Khabiirka Dyslexia Capital Region Educational Service District (Degmada Adeega Waxbarashada) 113
  arobertsfrank@esd113.org | 360-464-6843

Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

# WAXAA QORAY GOLAHA LATALIYAYAASHA DYSLEXIA

**Dr. Alicia Roberts Frank**
Capital Region ESD 113
Wakiilka Khabiirka Dyslexia

**Andrea Archer**
Shaqaalaha Dyslexia ee Caalamiga ah
Wakiilka Samofalka

**Angie Withers**
Degmada Dugsiga Richland
Wakiilka Dhakhtarka Cilmi Nafsiga Dugsiga

**Annie Pennell**
Xafiiska Maamulaha Guud ee waxbarashada Dadwaynaha (OSPI)
Wakiilka Barnaamijka Kaalmada Waxbarashada

**Barb Casey**
Dugsiyada Hoose ee Prospect Point 3
Wakiilka Waxbarashada Gaarka ah

**Effie Triol**
ESD 112
Wakiilka Isku Duwaha Qoraalka

**Elizabeth Sorby**
Nidaamka Gaarka ah
Wakiilka Dhakhtarka Cilmi Nafsiga Dugsiga

**Heather Awbery**
Dugsiga West Valley
Degmada Maamulaha Degmadda

**Hilary Conville**
Degmo Dugsiyeedka Auburn
Wakiilka Waxbarashada Gaarka ah

**Dr. Jennifer McDonald**
Degmada Dugsiga Steilacoom
Wakiilka Gudida Dugsiga

**Jennifer Sicilia**
Degmada Dugsiga Spokane
Wakiilka Waalidka & Macalinka

**Jey Buno**
Dugsiyada Shacabka Evergreen
Wakiilka Dhakhtarka Cilmi Nafsiga Dugsiga

**Jodi Kinzel**
Degmo Dugsiga Bellingham
Wakiilka Khabiirka Qoraalka

**Julie Savelesky**
Degmo Dugsiga Camas
Wakiilka Dugsiga Hoose

**Justyn Poulos**
OSPI
Wakiilka MTSS

**Karma Hugo**
OSPI
Wakiilka Waxbarashada Hore

**Kathleen Rice**
Qandaraasle Madax Banaan
Wakiilka Isku Duwaha Qoraalka

**Lauren Barkley**
Degmo Dugsiga Ferndale
Wakiilka Dugsiga Hoose

**Dr. LaWonda Smith**
Dugsiga Qabaa'ilka Muckleshoot
Wakiilka Khabiirka Qoraalka

**Liz Coon**
Dugsiyada Shacabka Seattle
Wakiilka Dugsiga Hoose

**Liz Stewart**
OSPI
Wakiilka Waxbarashada Gaarka ah

**Dr. Marsha Riddle Buly**
Jaamacada Galbeedka Washington
Wakiilka Ardayga Luuqada Ingiriisiga

**Mary Waldron**
Puget Sound ESD 121
Wakiilka Isku Duwaha Waxbarashada Hore

**Dr. Michael Dunn**
Jaamacada Gobolka Washington ee Vancouver
Wakiilka Khabiirka Dyslexia

**Michelle Lewis**
Degmo Dugsiga Sumner Dugsiga
Degmada Maamulaha

**Dr. Molly Branson Thayer**
Jaamacadda Washington
Wakiilka Waxbarashada Sare

**Morgan Sampson**
Wakiilka Macluumaadka Ardayga OSPI

**Nova Williams**
Degmada Dugsiga Mercer Island
Wakiilka Maamulka Dugsiga

**Patricia Beuke**
Olympic ESD 114
Wakiilka Isku Duwaha Qoraalka

**Patsy Guglielmino**
Degmada Dugsiga Colville
Wakiilka Maamulka Degmada

**Sara Buetow**
Turjumida Dyslexia
Wakiilka Samofalka Dyslexia

**Shannon Criss**
Degmada Dugsiga Boistfort
Wakiilka Maamulaha Dugsiga Magaalada

**Shauna L Schmerer**
Degmada Dugsiga Almira
Wakiilka Maamulka

**Shelley O'Dell**
Dugsiyada Shacabka Shelton
Wakiilka Khabiirka Qoraalka

**Suzanne Ender**
Wakiilka Waalidka

**Dr. Yoshiko Schulz**
Degmo Dugsiga University Place
Wakiilka Ardayga Luuqada Ingiriisiga

# JADWALKA MAWDUUCYADA

Ujeedada Tilmaamaha Dhaqan Gelinta ........ 5
Sharciga Shaybaadhka Hore Dyslexia ........ 5
Agabka Shaybaadhka Machadka Fahanka ........ 7
Dyslexia Xaashida Macluumaadka ........ 8
Nidaamka Ugu Wanaagsan: Maamulaha Dugsiga iyo Degmada . ........ 11
Nidaamka Ugu Wanaagsan: Macalimiinta ........ 14
Shaybaadhka Machadka Fahanka: Waalidka iyo Qoysaska ........ 17
Wargelinta Sharciga ........ 19

# UJEEDADA DHAQAN GELINTA TILMAAMAHA

**Booqashada OSPI "Understanding Dyslexia (Fahanka Dyslexia)" websaytka si aad wax badan uga ogaato Shaybaadhka Hore ee Sharciga Dyslexia iyo shaqada Golaha Latalinta Dyslexia.**

Tilmaamaha waxaa sameeyay Golaha Latalinta Dyslexia (Dyslexia Advisory Council, DAC) si ay uga caawiyaan degmooyinka dugsiga Washington hirgelinta filashooyinka sharciga Dyslexia, laga bilaabo dayrta 2021.

Tilmaamuhu waxay sheegaan khayraad cadaymo ku salaysan oo DAC ah iyo nidaamka ugu wanaagsan ee lala isticmaali karo kala duwanaanshaha manhajka iyo nidaamyada qiimaynta ee ay isticmaasho degmooyinka dugsiga Washington. Macluumaadka kooban ee DAC nidaamyadan lagu teliyay waxa ay kor u qaadi doonaan dadaalka dhaqan gelinta macalinka iyo degmo dugsiga si looga taageero dhamaan dugsiyada akhriskooda iyo hormarka aqoontooda.

# SHARCIGA SHAYBAADHKA HORE DYSLEXIA

## Sharaxa Dyslexia

Dyslexia waxaa weeye khalkhal waxbarashada oo gaar ah kaas oo neerfaha ka yimaado oo markaa keena mushkilado aan la filan karin oo lagu arko sixitaanka ama garashada kalmadaha aqoonta iyo higaad liitada iyo awooda fahanka ee aan loo arag awoodaha garaadka, iyo dareenka. Mushkiladahani waxay si gaar ah u keenaan hoos u dhac qaabka dhawaqa luuqada taas oo badanaa lama filaan ah marka la eego awooda garaadka ee kale. Waxa labaad ee ay keeni karta waxaa kamid ah mushkilada dhamaystirka akhriska iyo khibar yar oo akhriska ah kaas oo keeni kara korniinka kalmadaha iyo aqoonta taariikhda (Xeerka Xildhibaanada 6162 (2018)).

## Golaha Latalinta Dyslexia

"Tilmaamaha maamulaha shacabka waa inuu talo waydiiyaa golaha talada dyslexia wixii arrimaha maamulida dyslexia ee habdhismeedka waxbarashada. Golaha waa inay ku jiraan dad dano kaga jiraan, oo ay ku jiraan, laakiin ayna ku xadidnayn, khabiirada qoraalka iyo dyslexia, khabiirada waxbarashada gaarka ah, macalimiinta dugsiyada hoose, maamulka dugsiga, dhakhtarka cilmi naftiga dugsiga, wakiilka gudida dugsiga, iyo wakiilka hay'ada samofalka oo leh khibrad dyslexia ah. Xubnaha goluhu waa inayna ku qaadan shaqada wax lacag ah.

Ugu danbayn Juun 1, 2019, goluhu waa inay gartaan oo ay sharaxaan agabka shaybaadhka iyo khayraadka si loogu dabaqo hormarka iyo shuruudaha waxbarashada, oo ay ku jiraan saxnaanta iyo isku halaynta, muujinaya hormarka aqoonta caadiga ah ama dyslexia, iyada oo lagu xisaabtamayo kormiinka neerfaha ilmaha ee caadiga ah, iyo in la gaadhsiiyo macluumaadkan maamulaha tilmaamaha shacabka.

Ugu danbayn Juun 1, 2020, goluhu waa inay soo saaraan talooyin iyo warbixino lasiinayo maamulaha tilmaamaha shacabka wixii ku saabsan:

a) Nidaamka ugu wanaagsan ee hirgelinta degmada dugsiga ee shaybaadhka sida loogu baahan yahay qaybta 2 ee sharcigan, oo ay ku jiraan tobobarka shaqaalaha degmada dugsiga ee

shaybaadhka samaynaya:

b) Nidaamka ugu wanaagsan ee isticmaalka nidaamyada badan ee taageerada si loo bixiyo wax ka qabad sida uu dhigayo qaybta 2 ee sharcigan, oo ay ku jiraan tobobaro shaqaalaha degmada dugsiga ee qaababka gaarka ah ee aaga ardaydu ku liidato lagu bartilmaameedsanayo;
c) Macluumaadka waxbarashada muunada ah ee waalidka iyo qoysaska ee la xidhiidha dyslexia taas oo ay ku jirto khayraadka taageerada waalidka; iyo
d) Nidaamka ugu wanaagsan ee lagaga jawaabayo baahiyaha ardayda ee fasalka labaad taas oo muujinsaysa muujin, ama aaga uu ku liito ee la xidhiidha, dyslexia." (RCW 28A.300.710))

## Shaybaadhka Hore ee Fasalada K-2

"Sebteember 1, 2019, maamulaha tilmaamaha shacabka, kadib markii uu eegey talooyinka golaha latalinta dyslexia sida uu dhigayo Xeerka Dib u Eegista Lagu Sameeyay ee Washington (Revised Code of Washington, RCW) 28A.300.710, waa in la ogaadaa agabka baadhitaanka iyo khayraadka, ugu yar ee lagu buuxinayo nidaamka wanaagsan si:

a) Loogu buuxiyo shuruudaha korniinka iyo waxbarashada, oo ay ku jiraan xaqiijinta iyo isku halaynta, taas oo muujinaysa hormarka aqoonta caadiga ah ama dyslexia, iyada oo lagu xisaabtamayo korniinka neerafaha caadiga ah ee ilmaha; iyo
b) Aqoonsiga muujinta iyo aaga lagu liito ee sida wayn mustaqbalka loogu saadaalin karo mushkilada akhriska oo ay ku jiraan garashada dhawaqa, xirfadala si wanaagsan wax u magacaabista, aqoonta dhawaqa xarfadaha, iyo taariikhda qoyska mushkilada ka haysato akhriska iyo luuqada ay baranayaan. Laga bilaabo Sebteember 1, 2019, maamulaha tilmaamaha shacabka waa inuu geliyaa websaytka hay'ada liisa agabka baadhitaanka iyo khayraadka lagu ogaaday qaybtan oo waa inuu ku daraa link-ga agabka iyo khayraadka, marka la diyaariyo." (RCW 28A.300.700))

## Taageerada Waxqabad iyo Nidaamka Qaybaha Taageerada (MTSS)

"Laga bilaabo 2021-22 sanad dugsiyeedka ah, sida lagu sheegey qaybtan, degmo dugsi kastaa waa inay isticmaalo multitiered systems of support (nidaam dhawr qaybood ah oo taageero) si ay wax ka qabad u siiso ardayda xanaanada caruurta ilaa fasalka labaad oo lagu arkay muujinta, ama aaga ay ka liitaan ee la xidhiidha, dyslexia. Si degmada dugsiga loo siiyo fursada ay wax kaga qaban karto waxqabadka ardayda oo aad uga hooseeya heerka fasalka, degmada dugsigu waa inay baadhaa ardayda xanaanada ilaa fasalka labaad oo ay ka eegaa muujinta, ama aaga la xidhiidha, dyslexia sida lagu sheegey qaybtan. (2)(a) Degmooyinka dugsiga waa inay isticmaashaa agabka baadhitaanka iyo khayraadka fududaynaya nidaamka ugu wanaagsan, sida lagu sheegey RCW 28A.300.700." (RCW 28A.320.260)

# FAHANKAAGABKA BAADHITAANKA WAXBARASHADA

## Waa Maxay Agabka Shaybaadhka Waxbarashadu

Agabka baadhitaanku waxaa weeye qiimayn kooban, lagu kalsoon yahay, oo la xaqiijiyay oo ay u isticmaalaan macalimiintu inay ka caaawiso ogaanshaha ardayda khatarta ku jira iyo kuwa aan ku jirin - khatarta mushkilada waxbarashada gaarka ah iyo ama dyslexia.

Agabka shaybaadhka caamka ah ee raacaya qaabka:

- Qiimaynta degdega ah ee la bartilmaameedsaday ee xirfadaha gaarka ah ee muujinaya hadii ardayda ay hormar wanaagsan ka sameeyeen akhriska guusha.
- Foomamka u dhigta ee kale si markaa loogu bixin karo sadex ilaa afar jeer sanadkii.
- Tilmaamaha heerka leh ee lagu maamulo iyo dhicbo siinta.
- Samaynta heerar lagu kalsoon yahay oo sax ah.
- Jawaabta dhaqanka iyo luuqada ee ardayda Washington.

## Isticmaalka Agabka Shaybaadhka Waxbarashada

- Agabka shaybaadhka lagu bixiyo wixii ah ujeedo qiimaynta sida ay dhamaan ardayda ay uga jawaabayaan tilmaamaha rasmiga ah iyo hadii ardayga uu ku jiro khatar natiijada waxbarashu inay yaraato ah.
- Agabka shaybaadhka waxa uu siin karaa dugsiyada iyo macalimiinta macluumaadka wax ka badalka ama haynta tilmaamaha ama hadii ay cusub tahay ama wax ka qabadka dheeraadka ah hadii loo baahdo.
- Macluumaadka agabka shaybaadhka waxa ay ka caawin karaan dugsiyada iyo degmada inay qiimayso wax ku oolnimada tilmaamaha iyo barnaamijyada waxka qabadka.

## Isla Eegitaanka Isticmaalka Agabka Shaybaadhka Waxbarashada

Tilmaamaha shaybaadhka, oo ay ku jiraan kuwa qaba laxaad la'aanta waxbarashada, waxa ay badankoon ama dhaamantood leeyihiin sifooyinka soo socda:

- Waxay ka caawiyaan ogaanshaha baahida imtixaanka mustaqbalka
- Bixinta dhakhsaha ah, dhibcaha, iyo turjubaada
- Ku haboon tiro dad oo badan
- Mararka qaar waxaa lagu bixin karaa habdhismeedka kooxeen, in la yareeyo saarida diirada, in la bixiyo qiimayn gaar ah oo dhawr aaga ah, sida luuqada, garaadka iyo xirfadaha dad dhax galka.

# DYSLEXIA XAASHIDA MACLUUMAADKA

Laga bilaabo 2021-22 sanad dugsyeedka ah, degmo dugsigu waxay baadhi doontaa ardayda ku jirta K-2 si loo eego waxa ay ku liitaan homarka xirfadaha qoraalka ee markaa la xidhiidhi kara dyslexia.

## Macluumaadka Dyslexia

Dyslexia waxaa weeye:

- Farqi maskaxda ah oo markaa adkeeya nidaamka dhawaqa hadalka, gaar ahaan awooda maqalka, badalka, iyo ku badalka codka shakhsiga kalmado.
- Waxaa lagu sifeeyaa inay tahay caqabad akhriska ah iyo higaada ah, gaar ahaan marka lala xidhiidhiyo xarfadaha iyo codadka inta u dhaxaysa.
- Waxay u badan tahay inay horseedo mushkilado waxbarashada iyo xasuusashada kalmadaha, fahanka waxa la akhriyay, iyo in fikirka warqad lagu qoro.
- Lama xidhiidho garaadka guud.
- Ma jirtaan wax mushkilad muuqaal ah ama wax keeney rabitaan la'aan, rabitaan, helitaan aqoon qani ah, ama waxbarashada fasalka dhaxdeeda oo aan wax ku ool ahayn.

**FIIDYAW: Waa maxay Dyslexia/Sharaxa Dyslexia** oo ay qortay Margie Gillis oo la shaqaysa Understood.org

## Diirada Saarida Waxa Lagu Wanaagsan Yahay

Hadii ilmaha qabo dyslexia waxa dhici karta inay ku adag tahay akhriska, qoraalka, iyo hadalka laakiin sidoo kale uu leeyahay hibo iyo rabitaan ay tahay in la dhiiri geliyo. Waxay **yeelan** karaan xirfado dhawaq iyo fikir ah, sida:

- Ikhtiraac, fikir balaadhan oo lagu xalin karo mushkilada qaab kale
- Xirfadaha dhegaysiga
- Sawirashada iyo wax iswaydiinta
- Xirfadaha garashada qaababka
- Dhimsaha, isku keenista iyo ku shaqaynta shayada
- Xirfadaha jimicsi, farshaxan ama muusig

## Waxyaabaha Caamka ah ee Ku Adag

### Ilmo Kastaa Waa Gaar

Dyslexia waxa ay u eeg tahay si gaar ah ilmo kasta da'adaha iyo heerarka kala duwan. Waxaa caam ah in dadka qaba dyslexia ay ku adkaato inay ku dhawaaqaan kalmadaha laba ama wax ka badan oo dhawaq ah leh, sida calaamadaha hoose.

#### *Waxbarashada dugsiga kahor ilaa Xanaanada Caruurta*

- Dib u dhac hadalka (da'da 2-3)
- Raac tilmaamaha
- Barashada iyo xasuusta xarfaha magacyada
- Laxanka

#### *Sanada Waxbarashada Hore*

- Ku xidhiidhinta kalmadaha codadka
- Ku qorista fikirka warqad

- Raacitaanka tilmaamaha dhawrka talaabo
- Xasuusashada macluumaadka xisaabta iyo ka shaqaynta xisaabta afka
- Dhimista xawaaraha ama yaraynta akhriska, xataa hadii ay tahay kalmado yaryar ama caam ah
- Ka reebista kalmadaha, qaybo kalmadaha ah, iyo codadka marka wax la akhriyayo
- Higaad liidata ama aan saxnayn
- Isku darka kalmadaha nuxurka iyo ujeedooyinka (sida, roodhi/cajiin)
- Habdhaqanka wax is dhaafinta

### *Sanadaha Waxbarasho ee Danbe*

- Kor u akhrin
- Akhriska iyo qoraalka kalmadaha oo laba ama wax ka badan oo dhawaq leh
- La socodka tiro badan oo akhris iyo qoraal ah
- Shaqooyinka akhriska (laylisyada, qoraalka, iimeelada, qorashada, iwm.)
- Barashada luuqad qalaad

## Maxaa Wax Taraya?

Marka uu helo tilmaamaha iyo taageerada wanaagsan, ilmaha qaba dyslexia waxa uu baran karaan akhriska iyo qoraalka. Tilmaamaha gaarka ah way cad yihiin oo waxayna ku salaysan yihiin cadaymaha nidaamka waafaqsan daraasada waxbarashada iyo sayniska.

## Xidhiidhinta Dugsiga

**Wada shaqaynta qoyska/dugsiga waxay daruuri u tahay guusha aradayga** Talaabada kowaad ee marka waalidka ama koriyuhu uu eegayo hormarka ilmahoodu waa inay balan qabsadaan ay kagala hadlayaan macalinka:

- Walaacyada iyo su'aalaha waalidka ama koriyaha
- Walaacyada macalinka iyo su'aalaha
- Talaabooyinka lagu ogaanayo waxa ilmaha ku adag iyo baahiyihiisa
- Kulanka daba socodka ee lagu wadaagayo fikirada oo lagaga wada hadlayo tilmaamaha la xidhiidha baahida ilmaha

## Taageerada Fasalka

### Qaabilaada Abuuriga Helitaanka

Marka laga tago tilmaamaha munaasabka ah, qaabilaadu waxay ka caawisaa caruurta qabta dyslexia fasalka dhaxdiisa iyo inay kordhiyaan madaxbanaanidooda. Taageerada qaar ardayda waxa u tari kara waxaa kamid ah:

- Kordhinta wakhtiga qoraalka iyo akhriska
- Jajabinta layliska dheer
- Meel aamusan oo wax lagu akhristo iyo imtixaanka
- Buuga cod ah (oo ay ku jiraan buugaagta waxbarashada) ama taageerada kombuyuutarka ee akhriska (sida, Bookshare ama Learning Ally)
- Kombuyuutar leh sooftiweer muujin leh
- Qoraalka hoose ee marka la daawanayo fiidyawyada si loogu xoojiyo aqoonta kalmada Eeg Waaxda Oregon ee Ururka Caalamiga ah ee Dyslexia (Oregon Branch of the International Dyslexia Association, ORBIDA) wixii macluumaad dheeraad ah

## Taageerada Bulshada/Dareenka

### Dhismaha Xirfadaha Xooganaanta iyo Ololaynta

Caruurta qabta dyslexia waxay yeelan karaan kalsooni daro nafta, warwar iyo isku buug. Waalidka iyo koriyayaasha waxa ay tusi karaan aragti wanaagsan iyo kalsooni:

- Iyada oo ogaanaya oo ku dhiiri geliya ilmahooda waxa uu ku wanaagsan yahay, rabo iyo waxa uu jecel yahay
- Ka faa'idaysiga fursadaha waxbarashada la hayo ee bulshadooda iyo caalamka
- U akhriska caruurta, daawashada fiidyaw, iyo dhagaysiga qoraalka mawduucyada fasalka wakhtigan
- Diirad saarida hormarka iyo guusha ilmahooda
- Barista ilmahooda:
    - in qof kastaa uu leeyahay waxa uu ku wanaagsan yahay iyo wax ku adag
    - sida loo dalabado kaalmo oo looga hadlo baahihooda (u ololaynta nafta)

## Khayraad Dheeraad ah

- Goobta OSPI ee Dyslexia iyo Tilmaamaha Khayraadka
- Ururka Dyslexia ee Caalamiga ah (International Dyslexia Association, IDA) Qaybta Washington ee IDA
- Macluumaadka Isbaanishka ah ee dyslexia
- National Center for Improving Literacy (Xarunta Qaran ee Hormarinta Aqoonta)
- Understood
- Kaalmada Dyslexia ee Jaamacada Michigan
- Waalidka iyo koriyayaashu waxay la daawan karaan kan caruurtooda: Eeg Kala Duwanaanshaha Dyslexia

# NIDAAMKA UGU WANAAGSAN SHAYBAADHKA AQOONTA: MAAMULAYAASHA DUGSIGA IYO DEGMADA

Laga bilaabo 2021-22 sanad dugsyeedka ah, degmo dugsigu waxay baadhi doontaa ardayda ku jirta K-2 si loo eego waxa ay ku liitaan homarka xirfadaha qoraalka ee markaa la xidhiidhi kara dyslexia.

## Baadhitaanka Waxbarashada

Baadhitaanka aqoonta waxaa weeye qiimayn kooban, la isku halayn karo oo la xaqiijiyay oo ay isticmaalaan macalimiinta si loo ogaado ardayda ay dhici karto inay ku jiraan khatar mushkilada waxbarashada ah.

Agabka shaybaadhka waxbarashadu waa:

- Qiimayn dhakhso ah oo la bartilmaameedsaday oo xirfado gaar ah.
- Tilmaamaha heerka leh ee lagu maamulo iyo dhicbo siinta.
- Jawaabta dhaqanka iyo luuqada ee ardayda Washington.

Baadhaha waxbarashada ***MAAHA*** agab lagu baadho dyslexia.

## Xirfadaha ay tahay In la Baadho

Agabka shaybaadhka aqoonta ee ay tahay in lagu qiimeeyo xirfadaha soo socda, sida uu dhigayo sharciga gobolku:

- Garashada Dhawaqa
- Garashada Qaabka Dhawaqa
- Aqoonta Dhawaqa Xarfaha
- Magacaabista Tooska ah ee Balaadhan (Rapid Automatized Naming, RAN)— Fadlan ogsoonaw in inkasta oo xirfadaha RAN la hormarin karo, marka hore la iskuma dhigi karo ama la isma xasuusin karo.

## Nidaamka Baadhitaanka

Si loo qiimeeyo fahanka degmooyinka ee sida Baadhitaanka Aqoonta K-2 ay ula jaan qaadayso qiimaynta guud, Xafiiska Maamulaha Tilmaamaha Shacabka (Office of Superintendent of Public Instruction, OSPI) iyo Golaha Latalinta Dyslexia waxay soo saareen Wakhtiga Talooyinka ee xirfadaha aqoonta ee fasal kasta K-2.

Nidaamka gaarka ah ee degmado dugsi kasta waxay kala duwan tahay waxayna ku xidhan tahay talooyinka degmada ee shaybaadhaha ay degmadu doorato. OSPI/Golaha Latalinta Dyslexia waxay abuureen dhabo loogu sheegayo ikhtiyaarada degmada. Oganshaha Dhawaqa, Ogaanshaha Qaabka Dhawada iyo Aqoonta Dhawaqa Xarafka waa in la siiyaa sanad kasta ardayda dhamaan heerka fasalka sadexaad.

- Ardayda ku jirta badhtanka sanadka waa in lagu sameeyaa baadhitaan lodkood ah taariikhda baadhitaanka ee xigta.
- Ardaydu waa inay maraan qiimaynta Magacaabista Tooska ah ee Balaadhan kaliya mar, ugu yaraan afar todobaad kadib marka la qoro.

- Hadii ardayga K-2 lagu arko aaga uu ka liito oo baadhitaanka hore ah, waa in lala socdaa hormarka.
- Koox ayaa qiimayn doonta warbixinaha oo markaa wax ka qaban doonta iyada oo u maraysa taageerada nidaamyada qaybaha badan.
- Qoysasku waa inay mar kasta ay ka shaqeeyaan go'aan gaadhista oo ay u sheegaan hormarka ardayga.
- Hadii, marka la bixiyo waxka qabadka dhawrka qaybood ah, ardayda waxay sii wadi doonaan muujinta dyslexia markaa degmada dugsiga waa inay kula talisaa waalidka iyo qoyska ardayga in ardayga loo qiimeeyo dyslexia ama laxaad la'aan gaar ah oo waxbarashada ah.

## Yaa Baadhitaanka Maraya

Ardayda ku jirta fasalada K-2 ayaa la baadhi doonaa.

**Tilmaamaha ardayda u qalma barashada luuqada Ingiriisiga:** Agabka qiimaynta waa in la turjubaa qiimaynta (cida qortay) oo uu fuliyaa cid si wanaagsan ugu hadlaysa luuqada uu ardaygu ku xoogan yahay.

## Bixinta Agabka baadhitaanka Aqoonta

- Si sida ugu wanaagsan loogu bixiyo tilmaamaha iyo waxka qabad agabka baadhitaanka ah waa in uu bixiyaa macalinka fasalka oo shahaado u haysta oo duwaanka ugu jirta.
- Waxaa weeye masuuliyad saaran maamulka dhismaha hay'ada waxbarashada deegaanka (LEA) inuu xaqiijiyo in dhamaan macalimiinta fasalada K-2 inay ka qayb galaan xirfadlaha baadhaya degmada gaarka ah iyo tobobarka lagu bixiyo agabka baadhitaanka taas oo waafaqsan talooyinka baahinta.
- LEA oo ay la socdaan maamulayaasha dhismuhu waa inay sameeyaan jadwalka barashada iyo tobobarka xirfadaha ee macalimiinta iyo shaqalaaha cusub.

## Muxuu Baadhitaanka Hore Daruuri u Yahay

Sadex shay oo muhiim u ah natiijada daraasada ee baadhitaanka hore ee khatarta dyslexia:

- Qaabka akhrika hormarka ayaa daruuri ah marka hore.
- Mushkilada akhriska waxaa lagaga hortagi karaan oo waxaa lagu bixin karaa aqoonta iyo wax ka qabadka hore.
- Hadii ayna jirin waxka qabad sare, akhristayaasha ay ku adag tahay ma qiimeeyaan "soo gaadhitaanka" oo waxaana jiri karta khatar keeni karta ku guul daraysi waxbarashada oo mustqbalka ah.

**FIIDYAW: Waa maxay Dyslexia/Sharaxa Dyslexia** oo ay qortay Margie Gillis oo la shaqaysa Understood.org

Eeg Baadhitaanka Dyslexia wixii macluumaad dheeraad ah.

## Macluumaadka Dyslexia

Dyslexia waxaa weeye:

- Kala duwanaanshah neerfaha ah oo la dhaxlo taas oo saamaysa nidaamka dhawaqa (codka) luuqada, gaar ahaan awooda in la qaato oo wax laga badalo codka gaarka ah ee kalmadaha, taas oo horseedi karta mushkilado hormarka kalmadaha ah, fahanka akhriska, iyo bandhiga qoraalka.
- Waxaa lagu sifeeyaa inay tahay caqabad akhriska ah iyo higaada ah, gaar ahaan marka la

xidhiidhiyo xarfadaha iyo codadka inta u dhaxaysa.
- Lama xidhiidho garaadka ama dareenka guud.
- Ma keento rabitaan, ama wax ku oolnimada yar ee tilmaamaha fasalku.

## Khayraad Dheeraad ah

- Websaytka Dyslexia ee OSPI
- Websaytka Taageerada Nidaamka Qaybaha Badan ee OSPI
- Su'aalaha Badanaa La Iska Waydiiyo OSPI: Baadhitaanka Aqoonta Hore
- Muujinta Nidaamka Wanaagsan ee Farshaxanka Luuqada Ingiriisiga ee OSPI
- Xarunta Qaran ee Hormarka Aqoonta: Agabka Dyslexia
- Qaybaha Washington ee Ururka Dyslexia ee Caalamiga ah

# NIDAAMKA WANAAGSANEE BAADHITAANKA AQOONTA: MACALIMIINTA

Laga bilaabo 2021-22 sanad dugsyeedka ah, degmo dugsigu waxay baadhi doontaa ardayda ku jirta K-2 si loo eego waxa ay ku liitaan homarka xirfadaha qoraalka ee markaa la xidhiidhi kara dyslexia.

## Yaa Baadhitaanka Maraya

Ardayda ku jirta fasalada K-2 ayaa la baadhi doonaa. Ardayda Ingiriisga waa in la baadhaa waxay ku wanaagsan yihiin/luuqada guriga ay kaga hadlaan marka ay macquul tahay.

## Baadhitaanka Waxbarashada

Baadhitaanka aqoonta waxaa weeye qiimayn kooban, la isku halayn karo oo la xaqiijiyay oo ay isticmaalaan macaliminta si loo ogaado ardayda ay dhici karto inay ku jiraan khatar mushkilada waxbarashada ah.

Agabka shaybaadhka waxbarashadu waa:

- Qiimayn dhakhso ah oo la bartilmaameedsaday oo xirfado gaar ah.
- Tilmaamaha heerka leh ee lagu maamulo iyo dhicbo siinta.
- Jawaabta dhaqanka iyo luuqada ee ardayda Washington.

Baadhaha waxbarashada ***MAAHA*** agab lagu baadho dyslexia.

## Bixinta Baadhitaanka Aqoonta

- Si sida ugu wanaagsan loogu bixiyo tilmaamaha iyo waxka qabad agabka baadhitaanka ah waa in uu bixiyaa macalinka fasalka oo shahaado u haysta oo duwaanka ugu jirta.
- Waxaa weeye masuuliyad saaran maamulka dhismaha hay'ada waxbarashada deegaanka (LEA) inuu xaqiijiyo in dhamaan macalimiinta fasalada K-2 inay ka qayb galaan xirfadlaha baadhaya degmada gaarka ah iyo tobobarka lagu bixiyo agabka baadhitaanka taas oo waafaqsan talooyinka baahinta.
- LEA oo ay la socdaan maamulayaasha dhismuhu waa inay sameeyaan jadwalka barashada iyo tobobarka xirfadaha ee macalimiinta iyo shaqalaaha cusub.

## Nidaamka Baadhitaanka

Nidaamka degmo dugsi oo kastaa way kala duwan tahay waxayna ku salaysan tahay talooyinka cida daabacday agabka baadhitaanka ee ay doorteen.

OSPI/Golaha Latalinta Dyslexia waxay baahin doontaaTalooyinka Wakhtiga ee xirfadaha aqoonta ee fasal kasta laga bilaabo K-2. Talooyinkaas waxaa kamid ah:

- Aqoonta Dhawaqa, Aqoonta Qaabka Dhawada , iyo Aqoonta Codka Xarfadaha ee ay tahay in sanad kasta la qiimeeyo dhamaan heerka fasalka sadexaad.
- Ardayda ku jirta badhtanka sanadka waa in lagu sameeyaa baadhitaan lodkood ah taariikhda baadhitaanka ee xigta.
- Magacaabista Tooska ah ee Balaadhan waa in la bixiyaa mar kaliya, ugu yaraan afar todobaad

kadib marka la qoro.

- Hadii ardayga K-2 lagu arko aaga uu ka liito oo baadhitaanka hore ah, waa in lala socdaa hormarka.
- Raac la socodka baadhitaanka iyo/ama hormarka, shaqaale gaar ah waa inuu isku keenaa macluumaadka oo uu qaybiyaa warbixinta shaybaadhka oo siiyaa kooxda taageerada dugsiga.
- Kooxda taageerada dugsigu waa inay qiimaysaa warbixinaha si loo ogaado wax ka qabadka nidaamka taageerada qaybaha badan.
- Qoysasku waa inay mar kasta ay ka shaqeeyaan go'aan gaadhista oo laguna ogaado macluumaadka ugu danbeeya ee hormarka ardayga.
- Hadii ardaygu ay jirto wax uu ku liito oo markaa waafaqsan dyslexia kadib marka uu wax ka qabadka qaybaha ah sameeyay, degmada dugsigu waa inay ku talisaa qiimaynta jiritaanka laxaad la'aanta gaarka ah.

## Xirfadaha ay tahay In la Baadho

- Garashada Dhawaqa: awooda maqalka, aqoonta, masixida iyo isbadalka codadka kalmadaha lagu hadlay.
- Garashada Qaabka Dhawaqa: aqooda garashada balaadhan ee dhawaqa codka sida laxanka, wax ka badalka, tirada kalmadaha ee weedha ku jira, iyo dhawada kalmada dhaxdeeda.
  Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xirfdahan, eegReading Rockets iyo Xarunta Qaran ee Hormarinta Aqoonta.
- Aqoonta Dhawaqa Xarfaha: aqoonta codadka matalaya xarfadaha. (Waxaa sidoo kale taas kamid ah isku darka xarfadaha matalaya codka hadalka.)
  Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xirfdahan, eegReading Rockets iyo Xarunta Qaran ee Hormarinta Aqoonta.
- Magacaabista Tooska ah ee Balaadhan (RAN): awooda sida dhakhsaha ah loogu magacaabo iyada oo lagu dhawaaqayo shayo isku mid ah. Waxaa taas kamid ah xarfaha, tirooyinka, midabada, iyo shayada ee ku jira fasalka.
  **Fadlan ogsoonaw in xirfadaha RAN la hormarin karo, la isma sii karo ama bixiyo.** Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan RAN eeg Understood.org.

## Macluumaadka Dyslexia

Dyslexia waxaa weeye:

- Waxaa weeye kala duwananasho neerfaha ah oo la dhaxlo kaas oo markaa adkeeya dhawaqa codka, gaar ahaan wooda maqalka, badalka, iyo isku badalka codka kalmadaha gaarka ah, taas oo horseedi karta mushkilado hormarka kalmadaha ah, fahanka akhriska, iyo qoraalka.
- Waxaa lagu sifeeyaa inay tahay caqabad akhriska ah iyo higaada ah, gaar ahaan marka la xidhiidhiyo xarfadaha iyo codadka inta u dhaxaysa.
- Lama xidhiidho garaadka ama dareenka guud.
- Ma keento rabitaan, ama wax ku oolnimada yar ee tilmaamaha fasalku.

**FIIDYAW: Waa maxay Dyslexia/Sharaxa Dyslexia** oo ay qortay Margie Gillis oo la shaqaysa Understood.org

## Xaashida Macluumaadka

- Dyslexia Xaashida Macluumaadka
- Turjumida Dyslexia
- Dyslexia Xaashida Macluumaadka ORBIDA
- Xaashida Macluumaadka Understood

## Khayraad Dheeraad ah

- Websaytka Dyslexia ee OSPI
- Websaytka MTSS ee OSPI
- Muujinta Nidaamka Wanaagsan ee Farshaxanka Luuqada Ingiriisiga ee OSPI
- Xarunta Qaran ee Hormarka Aqoonta: Agabka Dyslexia
- Qaybaha Washington ee Ururka Dyslexia ee Caalamiga ah
- Reading Rockets

# FAHANKA BAADHITAANKA AKHRISKA: WAALIDKA IYO QOYSASKA

Laga bilaabo 2021-22 sanad dugsyeedka ah, degmo dugsigu waxay baadhi doontaa ardayda ku jirta K-2 si loo eego waxa ay ku liitaan homarka xirfadaha qoraalka ee markaa la xidhiidhi kara dyslexia.

## Macluumaadka Baadhayaasha Aqoonta

Baadhaha aqoontu waa:

- Imtixaan gaaban, aan rasmi ahayn oo la siiyo dhamaan ardayda si loo ogaado hadii baadhitaan dheeraad ah loo baahan yahay.
- Maaha qiimayn rasmi ah oo lagu ogaanayo caqabadaha waxbarashada.

## Waa Maxay Sababta Caruurta Loo Baadho

- Waxka qabadka hore ee lagaga jawaabayo caqabadaha akhriska ayaa ah qaabka ugu wanaagsan ee looga hortagi karo mushkiladaha kahor inta ayna aad u adkaanin mudo kadib.
- Marka la helo waxka qabadka hore iyo waxka qabadka mudada hore, ardayda ku jirta khatar mushkilada akhriska, oo ay ku jiraan dyslexia, waxa ay si guul leh u dhamaysan karaan waxbarshada iyo qalinjabinta kuuliyada, mihnada iyo nolosha madaniga ah.

## Bixinta Baadhitaanka

- Ardayda waa inay baadhaan macalimiinta fasalkoodu. Caruurta waxay qabtaan shaqada ugu wanaagsan marka la dejiyo oo ay dareen amaan ee ay la joogaan qof wayn oo ay garanaayn.
- Macluumaadka ay macalimiintu ku ogaatay baadhitaanka waxa ay ka caawin doontaa samaynta qorshaha tilmaamaha iyo in lagu ogaado kaalmada dheeraadka ah ee loo baahan yahay.

## Xirfadaha ay tahay in la Baadho

- Garashada Dhawaqa: awooda maqalka, ogaanshaha, u wareegitaanka, iyo isbadalka qaybaha yaryar ee codka kalmadaha lagu hadlo
- Garashada Qaabka Dhawaqa: ogaanshaha codka hadalka sida laxanka, wax ka badalka (kalmadaha ku bilaabma isku cod), tirada kalmadaha ee weedha ku jira, iyo dhawaqa kalmadaha dhaxdooda
- Aqoonta Dhawaqa Xarfaha: codadka matalaya xarfadaha. Waxaa sidoo kale taas kamid ah isku darka xarfadaha matalaya codka hadalka.
- Magacaabista Tooska ah ee Balaadhan: awooda sida dhakhsaha ah loogu magacaabo iyada oo lagu dhawaaqayo shayo isku mid ah. Waxaa taas kamid ah xarfaha, tirooyinka, midabada, iyo shayada ee ku jira fasalka.

## Nidaamka Baadhitaanka

Degmo dugsi kastaa waxay dooranaysaa baadhahooda waxbarashada ee gaarka ah oo waxayna dhaqan gelinayaan wakhtigooda.

Xafiiska Maamulaha Tilmaamaha Shacabka (OSPI) iyo Golaha Latalinta Dyslexia waxay ku talinayaan in la raaco tilmaamaha shaybaadhka waxbarashada:

- Dugsiyadu waa inay ka baadhaan ardayda "Aqoonta Dhawaqa, Aqoonta Qaabka Dhawaqa, iyo Aqoonta Codka Xarfadaha ugu yaraan hal mar sanadkii.
    - Xalaadaha Caruurta: Janaayo
    - Fasalka 1aad iyo 2aad: Dayrta

- Ardayda ku jirta badhtanka sanadka waa in lagu sameeyaa baadhitaan lodkood ah taariikhda baadhitaanka ee xigta.
- Dugsiyadu waa inay ka baadhaan ardayda Xirfadaha Magacaabista Tooska ah ee Balaadhan hal mar sanadkii.
- Ardayda lagu arko inay aag ka liitado baadhitaanka hore waxa lasiin doonaa waxka qabad oo hormarkooda ayaa lala socon doonaa.
- Macalimiinta bixiya baadhitaanka waxaa lagu tobobaray isticmaalka agabka baadhitaanka taas oo ku salaysan talooyinka baahiyaha.
- Qoysasku waxay ka qayb geli doonaan go'aan gaadhista iyo cusboonaysiinta macluumaadka waxqabadka ardayga.

**FIIDYAW: Waa maxay Dyslexia/Sharaxa Dyslexia** oo ay qortay Margie Gillis oo la shaqaysa Understood.org

## Macluumaadka Dyslexia

Dyslexia waxaa weeye:

- Farqi nidaamka dhawaqa hadalka, gaar ahaan awooda maqalka, badalka, iyo ku badalka codka shakhsiga kalmado.
- Waxaa lagu sifeeyaa inay tahay caqabad akhriska ah iyo higaada ah, gaar ahaan marka lala xidhiidhiyo xarfadaha iyo codadka inta u dhaxaysa.
- Waxay u badan tahay inay horseedo mushkilado waxbarashada iyo xasuusashada kalmadaha, fahanka waxa la akhriyay, in fikirka warqad lagu qoro.
- Lama xidhiidho garaadka guud.
- Ma jirtaan wax mushkilad muuqaal ah ama wax keeney rabitaan la'aan, rabitaan, helitaan aqoon qani ah.

## Ka baro in badan

Macalinka ilmaha ayaa ka jawaabi kara su'aalaha agabka baadhitaanka ee dugsigaaga loo adeegsado. Hoos waxaa ku yaal linkiyo websaytyo waxtar leh oo ku saabsan dyslexia (laxaad la'aan akhris iyo qoraal oo caam ah) iyo laxaad la'aanta waxbarashada ee kale:

- Xarunta Qaran ee Hormarka Aqoonta: Agabka Dyslexia
- Qaybaha Washington ee Ururka Dyslexia ee Caalamiga ah
- Understood.org
- LDOnline
- Boga OSPI Dyslexia

# WARGELINTA SHARCIGA

*Marka laga reebo meelaha la qorey, shaqadan ee Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha waxa liisanka siiyey Creative Commons Attribution License.*

*Liisanka agabka kale oo heerar kala duwan oo ogolaanshe ah ayaa si cad loogu muujiyay oo ku xiga macluumaadka agabka.*

*Khayraadkan waxa ay ku jiraan linkiyada websaytyada ee dadka kale wadaan. Linkiyadan waxa laguu siiyay si ay kaliya kuugu haboonaado oo ma muujinayso ama kama dhigna in la amaanayo ama ay kormeerto OSPI.*

*Hadii shaqadan la dhaqan geliyo, qoraalada isbadalka iyo dib u siinta ciwaanka, waxaa laga saari doonaa wixii astaamo ah ee Xafiiska Washington ee Maamulaha Tilmaamaha Shacabka. Bixinta sifooyinka soo socda:*

*"Khayraadkan waxaa laga soo qaadan karaa agabka rasmiga ah ee lagu bixiyo Xafiiska Maamulka Tilmaamaha Shacabka. Agabka rasmiga ah ee lagu heleyo websaytka dyslexia OSPI.*

*Fadlan waxa aad xaqiijisaa in ogolaanshaha la heley lagu isticmaalayo dhamaan waxyaabaha daabacaadan (sawirada, qoraalka, shaxda, iwm.) in ayna abuurin shaqaalaha OSPI, damaanad qaadayaasha, ama qandaraaslayaashu. Ogolaanshahan waa in loogu muujiyaa sida qoraan lahaansho habka ay qeexday haystaha sharciga daabacaaddu. Waa in la cadeeyaa in shaygu uu yahay mid kamid ah "marka laga reebo meesha haddii kale ee la qorey" waxyaalaha ka reeban liisanka furan ee OSPI.*

*Xog dheeraad ah, fadlan booqo Hagaha Daabacaadda iyo Liisan Siinta Macaamil Xuquuqda Dhawrsoon..*

*OSPI waxay ku bixisaa adeegsi loo simanyahay dhamaan adeegyada barnaamijyadeeda iyadoon lahayn takoor ku salaysan Sinji, isir, caqiido, diin, midab, asalka wadanka, da', askartii hore ee la fasaxay ama heer ciidan, nooca sinji oo uu ku jiro muujin sinji ama aqoonsi, jiritaanka wax dareemeed, maskaxeed ama naafanimo jidheed, ama adeegsiga ay hage ah oo tababaran ama qof naafo ah oo xaywaan u adeego. Su'aalaha iyo cabashooyinka takoorka la tuhunsanyahay waa in lagu soo hagaajiyaa Equity and Civil Rights Director at 360-725-6162 ama P.O. Box 47200 Olympia, WA 98504-7200.*

*Waxa aad kala soo degtaa agabkan oo PDF ah oo websaytka dyslexia ee OSPI (https://www.k12.wa.us/about-ospi/workgroups-committees/currently-meeting-workgroups/washington-state-dyslexia-advisory-council/about-dyslexia). Xogtan waxaa lagu heli karaa qaab kale markii la codsado. La xidhiidh Xarunta Khayraadka 888-595-3276, TTY 360-664-3631. Fadlan gudbi lambarka dokumentigan si adeeg degdega ah loo qabto: 20-0029.*

ESTD
1889

*Dhamaan ardaydu waxay isku diyaariyaan nolosha, nolosha shaqo iyo siday bulshada ula macaamili lahaayeen dugsiga sare kadib.*

Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

**Chris Reykdal** | State Superintendent
Office of Superintendent of Public Instruction
Old Capitol Building | P.O. Box 47200
Olympia, WA 98504-7200